



DIGNIINTA BIRTA NAXAASTA 'LEAD'

Naxaastu Waxay Sumayn Kartaa Ilmahaaga

Sidee ayey naxaastu 'lead' u waxyeelayn kartaa ilmahaaga?

Xataa inyar oo naxaas ah ayaa ilmahaaga waxyeeli karta. Haddii naxaastu gasho ilmahaaga, waxay ku adkayn kartaa inuu ilmahaagu:

- Wax barto
- Fejignaado
- Si fiican u dhaqmo

Maxay yihiin calaamadaha naxaasta 'lead' sunteedu?

Caruur badan oo qaba sunta naxaasta ayaan u dhaqmin una ekayn sidii qof buka. Dhiig baadhis ayaa ah sida keliya ee lagu garan karo inuu ilmahaagu qabo sunta naxaasta. **Kala hadal ilmahaaga takhtarkiisa ama kalkaaliyaha sidii ilmahaaga dhiigiisa loo baadhi lahaa ee looga ilaalin lahaa sunta naxaasta 'lead'.**

Kuma ayaa u baahan in la baadho?

Caruurta:

- Ku nool ama booqda guri la dhisay kahor 1978, gaar ahaan haddii aan dib loo habayn
- Calashada (cuna) rinjiga qalabka guryaha ama hareeraha dariishadaha
- Afka geliya birta ama waxyaabaha lagu ciyaaro ee rinjiga leh ama dahabka
- La siiyey dawooyinka hiddaha, sida indhakuusha ama wax la yidhaa 'tiro'
- Xidhiidh la leh dad taabta sunta naxaasta xagga shaqada ama madadaaladaba
- Dhawaan ka soo guurtay ama laga soo kaxaystay waddan kale



PUBLIC HEALTH
ALWAYS WORKING FOR A SAFER AND
HEALTHIER WASHINGTON

Maxaa ku keena caruurta sunta naxaasta 'lead'?

Boodhka iyo jajibka rinjiga guryaha gaboobay ayaa ah isha ugu weyn ee keenta. Ka dhawr caruurta rinjiga iyo balastarka fuqaya.

Boodhka sunta naxaastu wuxu geli karaa waxyaabaha caruurta ku ciyaaraan iyo gacmahoodaba. Naxaasta waxay liqaan marka ay gacmahooda ama qalabka ay ku ciyaarayaan afkooda geliyaan. Dhaq caruurta gacmahooda iyo qalabka ay ku ciyaaraan markasta oo boodhka ka dhaqdhaq.

Waxyaabaha kale ee guriga yaala ee yeelan kara naxaas waxa ka mida:

- Milixda iyo biyaha
- Alaabta ka samaysan caaga 'Vinyl'
- Waxyaabaha lagu ciyaaro iyo dahabka
- Alaabta dhoobda ka samaysan

Macluumaadka dheeraadka ah

Waaxda Caafimaadka Gobolka

(Washington State Department of Health)

Ka-hortaga Sunta Naxaasta Ilmaha

(Childhood Lead Poisoning Prevention)

1-800-909-9898

www.doh.wa.gov/ehp/lead

Guddiga Mareykanka ee Badbaadada Alaabta

La-isticmaalo

(US Consumer Product Safety Commission)

Dib-u Celenat La Xidhiidha Naxaasta Ku Jirta

Cinyaaraha

(Recalls Related to Lead in Toys)

1-800-638-2772

www.cpsc.gov/recentrecalls.html



DOH 334-141 AUGUST 2008 SOMALI